


Yaan wacaa hadaan u baahdo Caawino?
Maine Tuberculosis Control Program
Telephone 207-287-8157

Maine Public Health Nursing Program
11 State House Station
Augusta ME 04333-0011
Telephone 287-3259 or 1-800-698-3624 (Maine only)
TTY 1-800-606-0215

Ogaysiis aan lahayn midab kala sooc.

Qaybta u qaabilsan caafimadka dadweynaha iyo u shaqaynta dadka DHHS makala soocaan dadweynaha haday noqon lahayd itaal daro, cidad tahay, midabkaaga, caqidada, lab ama dhedig, da'da, iyo meeshaad ka timid ama aad ku dhalatay, si aad u ogaato ama ay kuugu fududato hawlaha aan qabano iyo caawitaanada aan bixino, haday noqon lahay shaqaalaysiin. Ogaysiiskan wuxuu balan qaadaya inuu adkeeyo sharciga qodobka II ee maraykanka dadka italka daran ee la sameeyey 1990, iyadoo la tixraacayo xuquuqda binuaadanka ee la dejiyey 1964. Qaybta 504 oo la baxnaaniyey 1973, wakhtiga midabkala sooca sharciga lagu soo rogey in la joojiyo 1975

August 2008



Caafimaad Sidee ah ayaan u baah nahay hadii aan qabo qaaxada maqaarka?



Qaxada

Waa laga hor tegi karaa
Waa la daaweyn karaa
Waa laga daawoobaa

Caafimaad sidee ah ayaan u baahanahay hadi la 'iga helo qaaxada maqaarka?

- ❖ Waa in lagaa qaado raajada feedhaha iyo dhiig si loo arko inaad qabtid cudurka qaaxada ama jeermiska qaaxada qarsoon. Waxaa lagu ogaan karaa inaad qabto cudurka qaaxada keliya iyada oo lagaa qaado tijaabo caafimaadeed, iyo hadii aad u gudbin kartid cudurkan ehelkaa iyo saaxiibadaa.
- ❖ Waxaa kaa eegi kara Dhakhtarkaaga, ama cusbitaalka Maine Medican Center hadaadan lahayn dhakhtar, marka lagaa baaro cudurka waxaad u baahan tahay balan dhakhtarkaga ama dhakhtarka kaa baray cudurka ee jooga cusbitalka Maine Medical Center qaybta qaaxada.

Hadaan u baahdo inaan tago MMC, sideen ku tagaa?

- ❖ Hadii aad raacayso baska, u yeer METRO: raac baska #1 ee ka baxa geesta jidka congress iyo jidka Bramhall, ama raac baska #8 kaga deg cusbitaalka hortiisa.
- ❖ Hadii aad gaari wadato: waxaad gaarigaa dhigan karta garaashka ku yaal jidka Bramhall iyo jidka Chadwick, ama garaashka kuyaala meesha ay iska jaraan Congress iyo Gilman. Wax lacag ah lagama qaadayo garaashkan.

Sidee ayaan isku diiwaan geliyaa MMC hadan ahay bukaan cusub?

- ❖ Waad tegi kartaa dhakhtarka MMC maalmaha Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 3:30 galabnimo si aad isu diiwaan geliso hadad tahay bukaan ku cusub dhakhtarka MMC. Uma baahnid inaad balan qabsato si aad isu diiwaan geliso. Maine Medical Center wuxuu ku yaalaa 22 Bramhall Street, Portland, ME
- ❖ Markaad timaado cusbitaalka, waxaad ka gashaa albaabka hore, kadib gal qolka **G320** waa qolka kuugu soo horeeya dhinaca midigtaada markaad ka soo gasho cusbitaalka albaabka hore.
- ❖ Qofka diiwaan geliyaha ayaa ku weydiin doona suuqa sida, magacaga, goortaa dhalatay, meesha aad degan tahay, waxay kaloo ku siin doonaan kadhka buluuga ah ee qaaxada kaasoo u sheegaya inaad diiwaanka ku jirtid. Kadhka buluuga ah waxaa ku yaal calaamad cas ama guduud ah, taasoo tusaysa inaad tahay bukaan dhakhtarka qaaxada.



Maxa la'iiga baahanyahay inaad soo qaato marka aan imaanayo MMC, maadama aan ku cusbahay dhakhtarka?

- ❖ Hadii aad haysato kadhka caafimaadka hore usoo qaado.
- ❖ Hadii aad codsatay Maine Care laakiin aadan helin u sheeg cusbitaalka inaad codsatay Maine Care.
- ❖ Hadii aad shaqayso, soo qaado bishii lasoo dhaafay jeegaga xagooda dambe. Hadii jeeg lagu siiyo usbuuc kasta, soo qaad afarta jeeg xagooda dambe, hadii jeeg lagu siiyo labadii usbuuc mar, soo qaado labada jeeg xagooda dambe.
- ❖ Hadii caawimo guud aad ka hesho magaalada Portland General Assistance hore u soo qaado waraaqda lacagta ay kugu siiyeen.

Sidee ku ogaadaa meesha layga qaadayo dhiiga iyo raajada feedhaha cusbitaalka MMC?

- ❖ Kadib marka aad is diiwaan gelisid, waa inaad tagtid **MMC** qaybta qaaxada oo kutaala dabaqa koowaad ee cusbitaalka, u raac wiishka cas ama guduudka ah dabaqa koowaad cusbitalka lagu daweeyo qaaxadu wuxuu kaa qaban doona dhinaca midigta marka aad wiishka cas ka soo degtid.
- ❖ Marka jawaabta raajada ay soo baxdo cusbitalka ayaa kusoo wacaya oo kuu sheegi doona waxay jawaabtaadu tahay iyo balan ay kuu dhigaan si aad u aragto dhakhtarka u qaabilsan qaaxada.